

Tasiilaadka Maandooriyaha ee Degmada Hennepin

Sannadkii 2021, 340 qof ayaa Degmada Hennepin ugu dhintay daawooyinka xanuunka culus oo ay iska badiyeen. Dalka oo dhan ayaa daawooyinka xanuunka ee culus laga isticmaalaa oo waa wax la qabatimo.

Heerarka geerida maandooriyaha: hennepin.us/opioid-dashboard

Uruurinta iyo tuurista ugu fiican cirbadaha

Ku caawi asxaabta iyo dadka aad garaneysa in ay meelo sax ah ku soo tuuraan daawooyinka culus. Waa in daawooytinka culus ee xanuunka lagu rido sanduuqyada ay u diyaarisay Degmada Hennepin.

Si aad u ogaato meelaha ay ku yaallaan sanduuqyada:

- Soo garaac 612-348-3777
- MaabKa santuuqyada ka eego hennepin.us/daawo

Caawinta dadka daawada iska badiya iyo ka-hortegiddeeda

Naloxone (Narcan)

Daawada la iska badinayo waa wax laga hortagi karo. Naloxone (oo la la yiraahdo Narcan) waa daawo lagula tacaalo dhibaatada daawada culus.

Qof kasta ayaa Naloxone ka soo iibsan kara Red Door Clinic oo u isticmaali kara naftiisa, asxaabtiisa ama qoyskiisa. Red Door Clinic sharci ahaan waxaa khasab ku ah in ay qariyaan magaca ama cinwaanka dadka.

- Kala soo xiriir Red Door Clinic 612-543-5555

Helitaanka saliingaha

Wadaagista cirbadaha waxaa ku faafi kara infakshan, sida cagaarshowga C iyo HIV. Red Door Clinic waxay dadka si bilaash ah ku siineysa cirbado cusub iyo sahay kale (shoolad ah cunto-karis, suuf, xarigga xididka, aalkolada nadiifinta).

Waa in la keeno cirbadaha la soo isticmaalay si loo qaato cirbado cusub iyo sahay kale marka uu kilinigu furan yahay.



Cinwaanka Red Door:

Dabaqa afaraad, Health Services Building
525 Portland Avenue
Minneapolis, MN 55415

Saacadaha Red Door:

- Isniinta: 8da ilaa 4ta
- Talaadada: 8da ilaa 4ta
- Arbacada: 8da ilaa 4ta
- Khamiista: 10ka ilaa 4ta
- Jimcaha: 8da ilaa 4ta

Shaqaalaha Red Door ee miiska soo-dhaweynta ama shaqaale kasta u sheeg in aad iska tuureyso cirbado ama aad rabto cirbado iyo sahay cusub. Shaqaalaha Red Door waxay ku hadlaan luuqadaha Isbaanishka, Soomaaliga, iyo Moong.

Cirbadaha aad soo isticmaashay ku soo rid caag adag oo dabool leh, sida caagga saabuunta dharka lagu dhaqdo.

Dabiibka iyo soo-kabsashada

Isticmaalka maandooriyaha waa wax la daaweyn karo. Soo-kabsashadu waa wax suurtagal ah.

Degmada Hennepin waxay dadweynaha u haysaa dabiib ah maandooriyaha iyo caafimaadka dhimirka.

- Soo garaac Degmada Hennepin 612-348-4111

Faahfaahinta dhibaatada daroogada culus iyo jawaabta Degmada Hennepin

Dhimashada daroogadan waa wax aad ugu soo badanaaya Degmada Hennepin, Minnesota, iyo dalka oo dhan. Daroogada ugu badan ee la isticmaalo waa fentanyl.

Daroogadan waxay dhib ku tahay dadka oo dhan. Hase yeeshee, waxa ay si aad ah u sii saameyneysaa kooxo gaar ah, sida dhallinta yaryar, Dhaladkii Hore ee Mareykanka, iyo Madowga Mareykanka.

Degmada Hennepin meelo badan ayey habka jawaabta kala shaqeysaa. Waxyaabaha aan sameyno waa ka-hortegid, jawaabid, iyo adeegyo ah dabiibid iyo soo-kabsasho.